



Xafiiska Wasiirka

Tixraac: SSC/WM/XW/XN009/2024

Taariikh: Meey 1, 2025

XEER-NIDAAMIYAHA JAANGOORYADA SAHAYDA SAFARRADA,

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in la sameeyo nidaam cad oo lagu maamulo Maaliyada Dowladda si loo hubiyo isla xisaabtan dhamaystiran, isla markaana loo sharciyeeyo qaabka ugu haboon ee diyaarinta iyo isticmaalka Miisaaniyada Dowladda SSC-Khaatumo.

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in dhamaan kharashyada Hay'adaha Dowladda SSC-Khaatumo loo sameeyo oo kaliya ujeedada gaarka u ah qoondeynta.

Markuu arkay Qodobka 9(1) xarafka H; ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu soo saaro xeerhoosadyo, tilmaamayaal iyo hagayaal loo isticmaalo xisaabinta, warbixinada iyo ilaalinta hantida Maamulka.

Markuu arkay Qodobka 9(1) xarafka L; ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu sameeyo Xafiiska nidaamsan, isku xiran oo ku haboon xakamaynta kharashyada iyo dhacdooyinka kale ee dhaqaale ee lagu galay miisaaniyada Dowladda, sidoo kale maamulka lacagaha.

Markuu arkay Qodobka 30(1), ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu soo saaro tilmaamo iyo hagaayaal qeexaya heerarka kala duwan ee fulinta miisaaniyadda.

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 31(1) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer Lr. 1/2023, oo tilmaamaya in Wasiirka Maaliyaddu soo saaro xeer nidaamiyeyaasha iyo habraacyada faahfaahinaya fulinta miisaaniyadda.

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad:

Magaca Xeernidaamiyaahan

1. Xeernidaamiyaahan waxa lagu magacaabayaa Xeernidaamiyaaha Jaangooyada Sahayda Safarrada Dowladda SSC-Khaatumo.

Qodobka 2aad:

Ujeeddada Xeernidaamiyaahan

2. Xeernidaamiyaahan waxa uu dejinayaa heerarka iyo tilmaamaha ku saabsan lacagta maalinlaha ah ee loo yaqaan maalin joogga (Daily Subsistence Allowance -DSA), taas oo loogu talagalay masuuliyiinta dawladda, shaqaalaha, iyo dadka kale ee hawlaha rasmiga ah u socda.
3. Ujeeddadu waa in la hubiyo caddaalad, hufnaan, iyo isla xisaabtan iyadoo la daboolayo kharashaadka macquulka ah ee lagu baxsho safarka hawlaha rasmiga ah.

Qodobka 3aad:

Eray-Bixinta Xeernidaamiyaahan

1. Erayada hoos ku xusan, haddii aan si kale xeer u fasirin waxaa loola jeeda macnahan iyo ujeeddooyinka soo socda:

1. Maalinjooga (DSA)	Lacag maalinle ah oo lagu daboolo kharashaadka cunto, hoy, iyo qarashaadka kale ee yaryar inta lagu jiro safarka rasmiga ah.
2. Safar Rasmi ah	Safar uu qofku u baxo hawl shaqo oo dawladeed ama mid rasmi ah.
3. Hoy	Kharashaadka la xidhiidha meelaha la seexo sida hoteelada ama guryaha martida.
4. Kharashaadka Yaryar	Waxyaabo yaryar oo lagu baxsho safarka sida gaadiidka gudaha, isgaarsiinta, ama adeegyo kale oo fudud.
5. Safarrada Gudaha	Safarrada ka dhaca magaalo ama degmo gudaheeda, iyadoo aan la dhaafin xuduudaha maamulka halkaas uu ka jiro.
6. Safarrada Dalka	Safarrada ka dhaca gudaha dalka oo dhan, kuwaas oo u dhexeeya magaalooyinka, gobollada, ama degmooyinka kaladuwan ee dalka.
7. Safarrada Dibadda	Safarro lagu aado dal kale oo ka baxsan xuduudaha dalka, waxaana badanaa lagu qabtaa shaqooyin ama howlaha ku saabsan arrimaha caalamiga ah.

Qodobka 4aad:

Baaxadda Xeernidaamiyaahan

1. Ku dhaqanka Xeer-nidaamiyahan waxa uu khuseeyaa:
 - a. Dhamaan shaqaalaha iyo masuuliyiinta Dowladda SSC-Khaatumo.
 - b. Dhammaan la-taliyeyaasha, khubarada, iyo qandaraasleyaasha loo shaqaalaysiiyay hay'adaha Dowladda ama kuwa matalaya golayaasha Dowladda.
 - c. Dhammaan wufuudda, wakiillada, iyo dadka kale ee ku socda magaca hay'adaha Dowladda.

Qodobka 5aad:

Safarrada Gudaha Dowladda SSC-Khaamumo

1. Safarrada gudaha maamula waxay u jeedadoodu tahay in la xaqiijiyo in Safarrada shaqaalaha dowladda lagu maamulo si waafaqsan siyaasadaha iyo habraacyada u degsan.
2. Waxyaabaha muhiimka ah ee lagu tixgelinayo waxaa ka mid ah:
 - a. In safarka uu yahay mid lagama maarmaan ah oo aanay jirin waddo kale oo lagu xallin karo shaqada iyada oo aan safar la sameyn.
 - b. In la hubiyo in kharashyada safarka ay ku saleysan yihiin miisaaniyadda loo qoondeeyay iyo heerarka lagu heshiiyay.
 - c. In safarka uu leeyahay oggolaansho rasmi ah oo ka timid madaxda hay'adda ama waaxda shaqaalaha uu ka tirsan yahay.

Qodobka 6aad:

Jaangooyada Safarrada Gudaha Dowladda SSC-Khaamumo

1. Safarrada gudaha maamulka ee masuuliyiinta iyo shaqaalaha dowladda waxaa lagu jaangooyaa sida ku cad shaxda hoose oo muujineysa mansabka iyo qoodada masuulka safraya si loo hubiyo in kharashyada iyo ujeeddooyinka safarka ay waafaqsan yihiin siyaasadaha iyo habraacyada dowladda.

Tirsi	Mas'uulka/Darajada Mas'uulka Dowladda SSCK	Jaangooyo (\$)
1	Hoggaamiye	150.00
2	Hoggaamiye Xigeen	100.00
3	Guddoomiye Golaha Shacabka	90.00
4	Guddoomiyaha Maxkamadda Sare	80.00
5	Wasiir/ Taliyaha Ciidanka	70.00
6	Guddoomiyaasha Madax-banaan	60.00
7	Xildhibaanada	60.00
8	Wasiir ku-xigeen, Wasiiru-dowlaha, Taliyaha Ciidanka	60.00
9	Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Guud, Xisaabiyaha Guud, Hantidhowre Guud, Qaryaqaan Guud, La-taliyaha Guud, Lataliyeyaasha iyo Khubarada, iwm	50.00
10	Madaxa Waaxda, Hoggaanada ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	40.00
10	Madax Qaybeed, maamuleyaasha, Saraakeesha hoose ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	30.00
11	Shaqaalaha Rayidka ah	20.00
12	Askarta, Ilaalada Madaxda	10.00

Qodobka 7aad:

Safarrada Gudaha Dalka Soomaaliya

1. Safarrada gudaha dalka waxaa loola jeedaa Safarrada shaqaalaha Dowladda ku aaddan gobollada kala duwan ee dalka. Qodobada muhiimka ah ee lagu maamulo waxaa ka mid ah:
 - a. In Safarrada lagu saleeyo qorshe hawleed cad oo muujinaya ujeeddada safarka iyo faa'iidada laga filayo.
 - b. In shaqaalaha loo fidiyo taageero ku filan oo ku saabsan kharashyada ay ku jiraan hoyga, gaadiidka, iyo cuntooyinka, iyada oo loo eegayo heerarka dowladda.
 - c. In warbixin dhammaystiran oo ku saabsan safarka lagu soo gudbiyo waqti ku habboon marka uu safarka dhammaado.

Qodobka 8aad:

Jaangooyada Safarrada Gudaha Dalka Soomaaliya

2. Safarrada gudaha dalka ee masuuliyiinta iyo shaqaalaha Dowladda waxaa lagu jaangooyaa sida ku cad shaxda hoose oo muujineysa mansabka iyo qoodada masuulka safraya si loo hubiyo in kharashyada iyo ujeedooyinka safarka ay waafaqsan yihiin siyaasadaha iyo habraacyada dowladda.

Tirsi	Mas'uulka/Darajada Mas'uulka Dowladda SSCK	Jaangooyo (\$)
1	Hoggaamiye	225.00
2	Hoggaamiye Xigeen	150.00
3	Guddoomiye Golaha Shacabka	135.00
4	Guddoomiyaha Maxkamadda Sare	120.00
5	Wasiir/ Taliyaha Ciidanka	105.00
6	Guddoomiyaasha Madax-banaan	90.00
7	Xildhibaanada	90.00
8	Wasiir ku-xigeen, Wasiiru-dowlaha, Taliyaha Ciidanka	90.00
9	Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Guud, Xisaabiyaha Guud, Hantidhowre Guud, Qaryaqaan Guud, La-taliyaha Guud, Lataliyeyaasha iyo Khubarada, iwm	75.00
10	Madaxa Waaxda, Hoggaanada ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	60.00
10	Madax Qaybeed, maamuleyaasha, Saraakeesha hoose ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	45.00
11	Shaqaalaha Rayidka ah	30.00
12	Askarta, Ilaalada Madaxda	15.00

Qodobka 9aad:

Safarrada Dibadda

1. Safarrada dibadda waxay muhiimad gaar ah u leeyihiin xiriirka caalamiga ah iyo fulinta howlaha dowladda ee heer caalami. Waxyaabaha muhiimka ah ee lagu xakameeyo waxaa ka mid ah:
- In Safarrada dibadda ay waajib tahay inay leeyihiin fasax rasmi ah oo ka yimid heerka sare ee maamulka dowladda.
 - In la xaddido tirada dadka safarka ku baxaya, iyadoo la hubinayo in shaqaalaha loo dirayo ay yihiin kuwa si gaar ah ugu habboon hawsha la qabanayo.
 - In la raaco habraaca kharashyada Safarrada dibadda, oo ay ku jirto qaadashada tikidhada diyaaradaha, dejinta hotel-ka, cuntooyinka, iyo qarashaadka kale ee rasmi ah.

- d. In la soo gudbiyo natiijada iyo warbixinta safarka si loo qiimeeyo faa'iidada ay dowladdu ka heshay safarka.

Qodobka 10aad:

Jaangooyada Safarrada Dibadda

3. Safarrada dibadda ee masuuliyiinta iyo shaqaalaha Dowladda waxaa lagu jaangooyaa sida ku cad shaxda hoose oo muujineysa mansabka iyo qoodada masuulka safraya si loo hubiyo in kharashyada iyo ujeedooyinka safarka ay waafaqsan yihiin siyaasadaha iyo habraacyada dowladda.

Tirsi	Mas'uulka/Darajada Mas'uulka Dowladda SSCK	Jaangooyo (\$)
1	Hoggaamiye	300.00
2	Hoggaamiye Xigeen	200.00
3	Guddoomiye Golaha Shacabka	180.00
4	Guddoomiyaha Maxkamadda Sare	160.00
5	Wasiir/ Taliyaha Ciidanka	140.00
6	Guddoomiyaasha Madax-banaan	120.00
7	Xildhibaanada	120.00
8	Wasiir ku-xigeen, Wasiiru-dowlaha, Taliyaha Ciidanka	120.00
9	Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Guud, Xisaabiyaha Guud, Hantidhowre Guud, Qaryaqaan Guud, La-taliyaha Guud, Lataliyeyaasha iyo Khubarada, iwm	100.00
10	Madaxa Waaxda, Hoggaanada ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	80.00
10	Madax Qaybeed, maamuleyaasha, Saraakesha hoose ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	60.00
11	Shaqaalaha Rayidka ah	40.00
12	Askarta, Ilaalada Madaxda	20.00

Qodobka 11aad:

Habraaca Soo Celinta Kharashaadka

- Qof kasta oo safar ku maqnaa waa inuu soo gudbiyaa qaansheegadka hoyga, gaadiidka, iyo kharashaadka kale ee la celin karo muddo todoba maalmood gudahood ah markuu safarka dhammeeyo.
- Haddii aan la keenin caddeymo, lacagta qarashka lama soo celin doono.

3. Qofka safarka ku baxaya wuxuu ka codsan karaa lacag horudhac ah oo gaaraysa 75% kharashaadka la qiyaasay ee safarka.
4. Lacagta aan la isticmaalin waa in lagu soo celiyaa khasnadda dawladda muddo shan maalmood gudahood ah marka safarka dhamaado.
5. Qoondada iyo jaangooyada Xeer-nidaamiyahan lagu dejiyey waa dabarka ugu sarreeya; ma jiri doono lacag dheeraad ah oo la bixinayo haddii aan si gaar ah loo oggolaan.

Qodobka 12aad:

Safarrada Degdegga ah

1. Haddii safar degdeg ah la sameeyo, Wasaaradda Maaliyadda waxay xaq u leedahay inay si ku-meel-gaar ah u beddesho heerarka qoondada iyo jaangooyada.

Qodobka 13aad:

Safarrada Waqtiga Dheer

1. Safarrada waqti dheer qaata muddo ka badan 30 maalmood, heerarka jaangooyada waxaa la dhimayaa 25% si loo waafajiyo kharashaadka hoos u dhaca ee joogitaanka dheer.

Qodobka 14aad:

Ciqaabta Ku-Tumashada Xeernidaamiyaahan

1. Qof kasta oo si khaldan u isticmaala ama been-abuur ku sameeya kharashaadka safarka waxaa lagu qaadi doonaa tallaabooyin ciqaabeed oo ay kamid yihiin:
 - a. Soo celinta lacagta si khaldan loo isticmaalay.
 - b. Joojinta shaqada ama ka saarista shaqada Dowladda.
 - c. Tallaabo sharci ah oo waafaqsan xeerarka la-dagaallanka musuqmaasuqa.

- d. Mas'uul kasta oo oggolaada dalabyada kharash ee aan caddayn ama si xad dhaaf ah loo buunbuuniyey isna waa lala xisaabtami doonaa, waxaana lagu qaadi doonaa tallaabo xeerarka waafaqsan.

Qodobka 15aad:

Hirgelinta iyo Dib-u-Eegista

1. Wasaaradda Maaliyadda ayaa mas'uul ka ah hirgelinta Xeer-nidaamiyahan iyo dib-u-eegista heerarka jaangooyada qoondada kharashaadka Safarrada si loola jaanqaado isbeddelada dhaqaale iyo xaaladaha safarka.
2. Xeer-nidaamiyahan waxaa si joogto ah dib loogu eegayaa sanadkiiba mar, wixii isbeddel ahna waa in ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada.

Qodobka 16aad:

Dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyaahan

1. Xeer-nidaamiyaha Jaangooyada Sahayda Safarrada Dowladda waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
2. Nuqullada Xeer-nidaamiyaahan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midka Wasaaradda Caafimaadka.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowladda SSC Khaatumo

Saxeex:

Abdittir



Lifaaqyada:

Tirsi	Mas'uulka/Darajada Mas'uulka Dowladda SSCK	Gudaha (\$)	Dalka (\$)	Dibadda (\$)
1	Hoggaamiye	150.00	225.00	300.00
2	Hoggaamiye Xigeen	100.00	150.00	200.00
3	Guddoomiye Golaha Shacabka	90.00	135.00	180.00
4	Guddoomiyaha Maxkamadda Sare	80.00	120.00	160.00
5	Wasiir/ Taliyaha Ciidanka	70.00	105.00	140.00
6	Guddoomiyaasha Madax-banaan	60.00	90.00	120.00
7	Xildhibaanada	60.00	90.00	120.00
8	Wasiir ku-xigeen, Wasiiru-dowlaha, Taliyaha Ciidanka	60.00	90.00	120.00
9	Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Guud, Xisaabiyaha Guud, Hantidhowre Guud, Qaryaqaan Guud, La-taliyaha Guud, Lataliyeyaasha iyo Khubarada, iwm	50.00	75.00	100.00
10	Madaxa Waaxda, Hoggaanada ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	40.00	60.00	80.00
10	Madax Qaybeed, maamuleyaasha, Saraakesha hoose ka tirsan Ciidanka, La-taliyaha, Maareeyayaasha Guud	30.00	45.00	60.00
11	Shaqaalaha Rayidka ah	20.00	30.00	40.00
12	Askarta, Ilaalada Madaxda	10.00	15.00	20.00